

Adeegyadayada gudniinka ee loogu talagalay Wiilasha yeryer

Birmingham
iyo Solihull

**Tilmaame kaa caawinaya
inaad adeegyada saxda ah
u doorto wiilkaaga**

Haddii aad qorsheyneyso in
wiilkaaga la gudo buug-yerahan
ayaa kaa caawinaya inaad
go'aan ka gaarto adeegyada
aad isticmaali karto.

Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato

Inkasta oo wiilasha badankood ay si wacan uga ladnaadaan dhib la'aan, si la mid ah dhamaan qalliinada, gudniinka wuxuu wataa halistiisa. Waa inaad si buuxda u tixgelisaa halista, oo haddii aad weli rabto inaad ku sii socoto si taxadar leh u dooro takhtarkaaga.

NHS-da waxay bixisaa oo kaliya lacagta gudniinka caafimaad ahaan lagama-maarmaanka u ah - kuwani waa dhif oo kuma jiraan qalliinada loo sameeyo diin iyo dhaqan dartood.

Guddiga Caafimaadka Guud (GMC) wuxuu ogsoon yahay in gudniinka wiilasha loo samayn karo sababo la xiriira diin iyo dhaqan. Waxaan kugula talineynaa in aad xaqiijiso in dhakhtarka sameynaya qalliinka uu ka diiwaangashan yahay GMC iyo in adeegga aad go'aansatey inaad isticmaasho ay tayadiisa soo baareen Guddiga Tayada Daryeelka (CQC).

Waxay u badan tahay inaad bixiso lacagta gudniinka, marka xaqiiji inaad ku heshiisaan qiimaha guud iyadoo qoraal ah ka hor intaan qalliinka la samayn.

Da'ada

Waxaan kugula talineynaa in gudniinka wiilkaaga la sameeyo inta uu yeryahay. Sidaas darteed, la xiriirista dhakhtarka aad dooratey xilli hore si aad talo uga hesho ayaa fiican. Haddii wiilkaaga uu weyn yahay ama aad qorsheyneyso inaad gudo wiilkaaga isagoo weyn, ma ahan talo wanaagsan inaad ku gudo wiilkaada meel ka baxsan isbitaalka, sidaas darteed rabitaankaaga kala hadal dhakhtarkaaga guud.



Oggolaansho

Labada waalid iyo / ama daryeelaha wata mas'uuliyada waalidnimo waa inuu oggolaansho bixiyaa kahor inta qalliinka aan la sameyn. Oggolaanshadu micnaheedu waa inaad rabto in wiilkaaga la gudo iyo in qalliinka iyo khatarada ka dhalan karana lagu sharxey.

Waxaad awoodaa inaad weydiiso su'aalo. Dhamaan dhakhaatiirta wanaagsan waa inay ku faraxsan yihiin inay kaaga jawaabaan su'aalahaaga. Waa inaad kalsooni ku qabtaa dhakhtarka aad isticmaaleysid.

Dhakhtarka waa inuu ku waydiiyaa caafimaadka wiilkaaga iyo taariikhda caafimaadka qoyskaaga ka hor intaan la sameyn gudniinka. Wiilkaaga waa inuu caafimaad qabaa kahor gudniinka.

Halkee baan u tagi karaa inaan wiilkayga guddo?

Waxaa jira dhakhaatiir gudniin oo badan oo ka diiwaangashan CQC kuwaas oo fulin kara qalliinka oo jooga Birmingham iyo Solihull, ama meelo kale.

Wixii faahfaahintooda ah, fadlan booqo www.cqc.org.uk/search oo ku qor "gudniin (circumcision)" iyo aagga ama goobta.

Joogitaanka xilliga gudniinka

Haddii aad rabto inaad la joogto wiilkaaga xilliga gudniinka la sameynaayo, waxaad u baahan tahay inaad arrintaas kala hadasho qofka sameyn doona gudniinka. Dhakhaatiirka qaar ka mid ah, ma ahan dhamaantood, waxaa ay ku farxaan inaad xaadir ahaato, sidaas darteed Kala hadal arrintaan marka ugu horeysa ee aad la xiriireyso.

Nadiif oo caabuqa laga dilay

Goobtu waa inay ahaato nadiif. Qalab caabuqa laga dilay, halka mar la isticmaalo waa in loo isticmaalo si loo yareeyo khatarta ah in wiilkaaga uu qaado caabuq. Dhakhtarka wanaagsan wuxuu isticmaali doonaa qalab iyo xirfad loogu talagalay in qalliinka laga dhigo mid amaan ah.

Waxaa laga yaabaa inaad doonayso inaad gudniinka ka dhigto qayb ka mid ah dabaaldegyada qoyska, laakiin xusuusnow, gudniinku waa qalliin waxaana loo baahan yahay in lagu sameeyo meel ku haboon oo deggan oo nadiif ah iyadoo la isticmaalayo qalab nadiif ah.

Maareynta xannuunka

Gudniinka waxaa uu wiilkaaga u keeni karaa xannuun. Waa in lagu sheegaa sida xannuunka loo maareyn doono inta lagu gudajiro gudniinka iyo sida loo yareeyo xannuunka ka dib markii aad guriga tagtaan.

Daryeelka gudniinka ka dib ah

Wiilkaaga waa in lagu hayaa gudaha xarunta ugu yeraan 30 daqiiqo ka dib marka dhiigbaxa gudniinka uu istaago. Shaqaaluhu waa inay kuu sheegaan waxa dhacaya marka xiga iyo sida loo daryeelo wiilkaaga. Markaad guriga tagto, waa in lagu siiyaa warqad faahfaahsan oo ku saabsan sida loo ilaaliyo wiilkaaga, oo ay ku jiraan goorta iyo meesha aad ku doonan karto caawimaad, iyo calaamadaha ay tahay inaad fiiriso. Waa in lagu siiyaa lambarka xiriirka si aad ula xiriirto saacadaha ka baxsan xilliga shaqada.

Haddii aad ka walwalsan tahay wiilkaaga ka dib gudniinka, waa inaad isla markiiba la xiriirtaa dhakhtarkaaga. Haddii aadan la xiriiri karin, ama aadan ku qancin talooda, waa inaad wacdaa **NHS 111** ama u qaadaa wiilkaaga A & E-da ee degaankaaga.

Xasuuso, haddii aad u timaado gudniinka oo aadan ku faraxsanayn wax kasta ama aad ka welwalsan tahay caafimaadka wiilkaaga, sabab kasta ha noqotee, uma baahnid inaad gudniinka sameeyso waqtigaan. Dhakhtar kasta oo wanaagsan waa inuu dhageystaa welwelkaaga oo dib u qorsheyaa ama joojiyaa haddii taasi ay tahay waxa aad adiga rabto.

Cabashooyin

Haddii aadan ku faraxsanayn adeegyada aad hesho, marka hore la hadal dhakhtarka sameeyey gudniinka. Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabtooda, waxaad la xiriiri kartaa Guddiga Caafimaadka guud ama Guddiga Kalkaalinta iyo Umulinta.

Gooynta Xubinta Taranka ee Gabdhaha

Waa sharci daroo sida uu dhigayo Sharciga Gudniinta Fircooniga ah ee Gabdhaha (2003) in la sameeyo Gooynta Xubinta Taranka ee Gabdhaha (FGC) – waxaa lagugu soo oogi karaa dacwad ah inaad agaasintey ama sameysey FGC, haddii aad joogto UK ama wadamo kale. Qofkii lagu helo dembi noocaas ah wuxuu la kulmi doonaa ganaax ah 14 sano oo xabsi ah



Gooynta xubinta taranka ee gabdhaha wax faa'iido caafimaad ah ma lahan.

Badbaadada Carruurta

Haddii aad ka walwalsan tahay, ama aad qabtid wax walwal ah oo ku saabsan ilmo ama qof dhalinyaro ah oo aad u malaynayso in lagu xadgudbayo, la dayacay ama la waxyeeleeyay, fadlan la xiriir:

- Kooxda MASH ee Solihull **0121 788 4300** (Isniin - Khamiis 8.45 subaxnimo - 5.20 galabnimo, Jimco 8.45 subaxnimo - 4.30 galabnimo). Haddii aad wacaysid wakhti ka baxsan saacadaha shaqada (habeenkii, dhamaadka toddobaadyada ama fasaxyada bangiyada) waxaa waxdaa kooxda xaalada deg degga ah adigoo isticmaalaya **0121 605 6060**.
- Adeegga Taageerada & Talooyinka Carruurta ee Birmingham (CASS) adigoo isticmaalaya **0121 303 1888**. Haddii aad wacaysid wakhti ka baxsan saacadaha shaqada (habeenkii,) dhamaadka toddobaadyada ama fasaxyada bangiyada) waxaad wacdaa kooxda xaaladaha deg degga ah adigoo isticmaalaya **0121 675 4806**.

Haddii aad ka walwalsan tahay qof weyn oo la shaqeyaa ama uu goobtooda shaqada si toos ah ugala xiriira carruur, ha ahaado shaqaale mushaar qaata ama mid ku shaqeyaa mutadawacnimo - fadlan booqo:

<http://www.lscbbirmingham.org.uk/>

<http://solihullscb.co.uk/report-abuse.php>

La xiriirista CCG

Haddii aad rabto inaad la xiriirto NHS Birmingham iyo Solihull CCG, waxaad wici kartaa **0121 203 3300** ama iimeeyl ugu dir kartaa bsol.comms@nhs.net

Su'aalaha qaar ee aad jeclaan lahayd inaad weydiiso marka aad dooraneysid adeegga gudniinka

Adeeg-bixiyaha ma sameeyaa qalliino badan oo lagu guuleysto?

Qalliino badan oo la sameeyey, waxaa ay muujineysaa in qalliinka uu noqon doono mid badbaada leh. Tirada ugu yer waa 20 sanadkiiba, lakiin wixii ka badan ayaa ka sii fiian.

Adeeg-bixiyaha maka diiwaangashan yahay Guddiga Tayada Daryeelka (CQC)?

Guddigan ayaa maamulaha bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo dhamaan adeegyada gudniinka ee leh dhakhaatiir ama kalkaaliyaal. Booqo bogga internetka www.cqc.org.uk ama wac **03000 616161**.

Maxay tahay aqoonta shakhsiyaadka sameynaya gudniinka?

Iska xaqiiji in dhakhtarradu ka diiwaangashan yihiin Guddiga Caafimaadka ee Guud. Booqo bogga internetka www.gmc-uk.org ama wac **0161 923 6602**.

Haddii qalliinka uu sameynayo kalkaaliye caafimaad, iska xaqiiji in uu ka diiwaangashan yahay Guddiga Kalkaalinta iyo Umulinta. Booqo bogga internetka www.nmc-uk.org ama wac **020 7637 7181**.

Meeqaa qof oo kala duwan ayaa wiilkaaga siin doonta daryeel iyo adeegyo?

Ma dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha ama noocyada kale ee shaqaalaha ayaa ilaalin doona wiilkaaga? Ma jiri doonaa dhakhtar laga heli karo oo jooga goobta?

Adeeg-bixiyaha ma bixiyaa buug qoraaleed oo sharxaya adeegyadiisa iyo qiimahooda?

Weydii inaad tan marka hore aad aragto, oo weydii in lagu sharxo wax kasta oo aadan fahmin. Haka cabsanin inaad su'aalo weydiiso.

Diyaar ma u yihiin inay ka hadlaan baahiyaha gaarka ah ee aad qabto?

Xaqiiji inay dhegeystaan oo ay wax ka qabtaan baahi kasta oo aad qabto.

Ma laguula dhaqmaa si xushmad leh markaad wax ka weydiiso daryeelka iyo adeegyada la heli karo? Ma qiimeeyaan dhaqankaaga iyo waxa aad aaminsan tahay?

Adeegyada caafimaadku waa inay had iyo jeer kula dhaqmaan si xushmad leh.

Dayeel nooc ah ayay bixiyaan?

Waa inaad joogtaa xarunta adeegga ugu yeraan 30 daqiiqadood. Waa inay ku siiyaan lambar telefoon oo 24 saacood shaqeeya ama xubin shaqaalaha ka mid ah oo loo xilsaarey in aad la xiriirto marka aad xarunta ka tagto.

Goormaa qalliinka la sameeyaa?

Haddii qalliinka la sameeyo dhammaadka usbuuca, adeeggu ma bixiyaa taageerada maalmaha fasaxa ah?

Adeeg-bixiyaha ma xaqiijiyaa qarsoodiga xogta caafimaadka ee ku saabsan adiga ama qoyskaaga?

Waa inay isticmaalaan kumbiyuutar amaan ah ama nidaamka diiwaangelinta.

Maxay yihiin qiimaha adeeg kasta?

Tan waa in si cad qoraal ahaan loogu sharxaa.

Ma waafaqsan yihiin qiimaha adeeg-bixiyaasha kale ku dalacaan adeegyada la midka ah?

Waa inaad qorsheysaa inaad wax ka weydiiso qiimaha dhawr adeegyo.

Sidee ayaa biilka adeegga lagaaga qaadi doonaa?

Ma dhammaan kharashyada iyo xulashooyinka lacag bixinta ee la xidhiidha qorshahaaga daryeelka ayaa si joogta ah loo sharaxayaa looguna qeexayaa biilkaaga?

Waa inaad tixgelisaa haddii aad lacagta ku bixineysid isla markiiba ama haddii lagu soo dirayo qaansheegad.